



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA  
WADAJIR DISTRICT COURT  
MOGADISHU-SOMALIA

Summad: MDWAD/ 844/2022

TR. 21/08/2022

UJEEDO:- SUGITO DHAXALKOOB, CADEYN TARIKO, IYO WAKAALADO.

Maanta oo ay taariikhdu tahay 21/8/2022, Waxaa maxkamadda Degmada Wadajir Hor Yimid Markhaatiyaasha kala ah:-

- 1-) **C/raxmaan Maxamed C/llaahi**, Somali ah, Ku Dhashay Garbahaarey, Sanadkii 1955, Ina Xaliimo Aadan C/lle, Lehna Somali Passportl.r.P00593784.
- 2-) **Cali Jaamac Sh.cali**, Somali ah, Ku Dhashay G/kacyo, Sanadkii 1981, Ina Xaawo Salaad Guuleed, Lehna. Lehna Somali Passportl.r.P01143974.

Waxayna si Wadajir ah Maxkamadda Horteeda uga Caddeeyeen in uu Geeriyooday Marxuum la oran jiray **MARXUUM BIIXI DOOL DHUDI**, kuna Geeriyooday Buuloburte Sanadkii:1990, Waxay kaloo Markhaatiyaashu caddeeyeen in Marxuumka Hooyadiis iyo Aabihiis ay Ka Geeri Horeeyen, Waxaana Marxuumka dhaxlaya oo uu ifka ogatagay 1- Xaas, 4- Wiil , iyo 1- Gabar, Waxayna kala yihiin sidan soo socota:-

**DADKA:-**

**BAH 1: ANBIYO DUBAD DALAAL “Marxuumka Ma uusan qabin”**

1-C/llaahi Biixi Dool Degan Nairobi Dhashay 1969 (Wiilkii Marxuumka)

**BAH 2: XABIIBO XASAN MAXAMED “Marxuumka Wuu qabay”**

1-Xabiibo	Xasan	Maxamed	Degan Garbahaarey	Dhalatay 1952	(Xaaskii Marxuumka)
2-C/samad	Biixi	Dool	Degan USA	Dhashay 1982	(Wiilkii Marxuumka)
3-C/rashiid	Biixi	Dool	Degan USA	Dhashay 1989	(Wiilkii Marxuumka)
4-Ismaacil	Biixi	Dool	Degan Muqdisho	Dhashay 1986	(Wiilkii Marxuumka)
5-Nimco	Biixi	Dool	Degan UK	Dhalatay 1988	(Gabadhii Marxuumka)

Waxay kaloo Markhaatiyaashu Caddeeyeen in aysan jirin Cid kale oo Marxuumka dhaxleysa oo Nool ama Geeriyootay haday noqon lahaayeen Asal Ama Farac.

**HANTIDA LAGA DHAXLAAYO MARXUUMKA.**

Waxay kaloo Markhaatiyaashu caddeeyeen in **MARXUUM BIIXI DOOL DHUDI** uu ifka uga tagay hanti Guud oo isugu jirta, Guryo Dhisan, Dhulal Banaan, iyo Wax alaale iyo wixii Hanti Maguurto ah ee Marxuumka Magaciisa ku qoran Waxaa leh Dhaxaltooyada Sare Ku Xusan.





**=MASAWIRKA MARKHAATIYAASHA=**

C/raxmaan Maxamed C/Ilaahi

Cali Jaamac Sh.Cali



**=MASAWIRKA WAKILKA GUUD EE DHAXALTOOYADA KANA MID AH DHAXALKA=**

Ismaacil Biixi Dool



**WAKAALADO**

Waxay Maxkamadda Degmada Wadajir Sugaysaa in dhamaan dhaxaltooyada ku maqan Dalka Dibadiisa oo kala ah :-1-C/Ilaahi Biixi Dool 2-C/samed Biixi Dool 3-C/rashiid Biixi Dool 4-Nimco Biixi Dool oo (Sharciga Dalka Uk Ku sidata Magaca Nimco Sharif Dool ) ay soo Wakiisheen **Ismaacil Biixi Dool** Sida Ku cad 1-Wakaald Guud Ref.No.SER/2/44/2022 Tr.08/08/2022, Kana soo baxday Safaarada Soomaaliya ku leedahay dalka Talyaaniga Uana Saxiixay Axmed Cabdiraxmaan Sh.Nuur Ahna Sii-hayaha Safaaradda. Waxaana Wakaaladaan Soo wada Xaqiijiyay Wasaarada Arimaha Dibada Ee Dowlada Fadaralka Soomaliya Iyo Maxkamadda Racfanka Ee Gobolka Banaadir. 2-Wakaalad Guud Ref No.23132/22 Tr.03/08/2022 kana soo baxday Xafiska Nootaayo Dayax laanta Nairobi Una Saxiixay Dr.Aden Jum'ale Mohamed 3-Wakaalad Ref No.218-2709 Tr.04/08/2022 Kana soobaxday Xafiska Hhmobile Notary una saxiixay Huseein Y Hussein Soona Martay Safaarada Somaaliya ku lee dahay Washinton Waxaana Wakaaladaan Soo wada Xaqiijiyay Wasaarada Arimaha Dibada Ee Dowlada Fadaralka Soomaliya Iyo Maxkamadda Racfanka Ee Gobolka Banaadir, Sidookale Xabiibo Xasan Mohamed oo Joogta Garbahaarey waxa aya soo wakiilatay **Ismaaciil Biixi Dool** Sida ku cad Wakaalad Guud Ref No.NAB/0314/2022 Tr.11/08/2022 Kana soo baxday Xafiska Nootaayo Abuura'si Una Saxiixay Dr.Xasan Maxamed Nuur, waxa ayna Dhamotooda uu Wakiisheen in uu maamuli Karo, dhaxalkoob iyo dhaxal qeybin u samayn Karo, xafidi Karo, gadi Karo, Hibeyn Karo, Wareejin Karo, Qofkasta Qismigiisa Ku Wareejin Karo, kireyn Karo, ka saari Karo, saxiixi Karo kaalintooda, una doodi Karo una dacwoon Karo oo qareen u qaban Karo, Maxkamadaha dalka hortooda u matali Karo qof waliba qismiga uu ku leeyahay dhamo hantida dhaxalka ah oo ay ka dhaxleen **MARXUUM BIIXI DOOL DHUDI.**

**DAMIINU MAAL**


- 1-) **C/raxmaan Maxamed C/Ilaahi & 2-)Cali Jaamac Sh.cali**, Waxay Maxkamadda Ka Hor Cadeeyeen in ay Damiinul Maal Buuxa ka Yihiin, Wixii Ka Yimaada Dhaxaltooyada Sare Ku Xusan Hadii ay Dhacdo in ay Qariyo Qof Ka Mid ah Dhaxaltooyada ama ay noqon waayaan dadka sare ku xusan Kuwii Dhabta ahaa, Masuul Buuxana ay Ka Yihiin Wixii Ka Yimaada Dhaxaltooyada Wakaaladaha Sare Ku Xusan Soo diray.



=SAXIIXA MARKHAATIYAASHA=

1- C/raxmaan Maxamed C/Ilaahi

2-Cali Jaamac Sh.Cali



=SAXIIXA WAKIILKA GUUD EE DHAXALTOOYADA KANA MID AH DHAXALKA=

Ismaacil Biixi Dool



SUGITAANKA MAXKAMADDA.

Maxkamadda Markay aragtay Codsiga Wakiilka dhaxaltooyadda, Markay dhageysatay marag furka Markhaatiyaasha, Markay aragtay Wakaaladaha sare ku xusan, Waxay Maxkamada Degmadda Wadajir sugeysaa geerida **MARXUUM BIIXI DOOL DHUDI**, oo ay dhaxalkiisa leeyihiin dadka sare ku xusan oo kaliya, waxay kaloo Maxkamaddu sugeysaa in Dhamaan Dhaxaltooyada ay soo Wakiisheen **Ismaacil Biixi Dool** oo Dhaxaltooyada Ka Tirsan, uuna Wakiil buuxa u yahay Dhamaan dhaxaltooydda, isla markaana uu awood buuxa u leeyahay ku tasarufka Hantida ay ka dhaxleen Marxuumka sare ku xusan, Waana Sugito dhaxalkoob iyo Wakaalado ansax ah waafaqsan Sharciga Islaamka iyo qouunka dalka, Waxaana lagu qoray diiwaanka guud ee mucaamilaadka.

KAALIYAHA MAXKAMADDA.

C/risaaq Cali Cabdi "Caabi"

GARSOORAHA MAXKAMADDA DEGMADA WADAJIR.

Dr. Axmed Maxamed Cali





